AMNIGA DEEBAAJIGA

Kiraystayaasha: Ogow Xuquuqahaaga!

Waa Maxay Amniga Deebaajiga?

Markaad u soo guurto guri cusub, mulkiilayaasha badankoodu waxay ku weydiin doonaan **deebaajiga oo ay dheer tahay kirada bisha kowaad.** Milkiilayaasha guryaha qaarkood waxay sidoo kale hore u weydiiyaan **kirada bisha ugu dambeysa.** Waxyaabo kale oo aad ka ogaan karto deebaajiga waa:

Deebaajiga badanaa waxaa u la siman yahay **hal bil kiradeeda**, laakiin **ma xadidna** waxa mulkiiluhu awoodo inuu ka qaado.

Milkiilayaasha waa inay ku shubaan deebaajiga **bangi gaar ah**. Haddii aysan samaynin, ma haysan karaan deebaajigaaga markad guurto ka dib.

Mulkiiluhu wuxuu haysan karaa **oo kaliya** deebaajiga si loogu daboolo **kirada aan la bixin, khidmadaha**, ama si **loo hagaajiyo** waxyeelada adiga ama martidaadu u gaysatay hoyga.

Milkiilayaasha qaarkood waxay kaa qaadayan lacag kuso guuritaan ah oo aan la soo celin karin halkii ay ka qaadan lahaayeen deebaaji. Akhri heshiiskaaga oo hubso in deebaajiga aad bixisay dib loo soo celin karo.

Waa inaan lagugu dalacin "rifanka iyo lisanka caadiga ah."

Ma inaan bixiyaa laba deebaaji?

Maya ilaa aad kiraysato laba guri! Haddii **mulkiilahaagu uu iibiyo dhismaha**, **waa inay** ku wareejiyaan deebaajiga mulkiilaha cusub.

Haddii **aad bedesho guriga**, mulkiilahaagu **waxa uu ku wareejin karaa deebaajigaagii hore** guriga cusub ama waxa uu **soo celin karaa deebaajigaagii** oo waxa uu kaa dhigi karaa **inaad bixiso mid cusub**. Waxaa laga yaabaa inaad bixiso deebaajiga cusub **ka hor** inta aan laguu soo celin kii hore.

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo kahor guuritaanka?

60 cisho kahor guuritaanka...

- **Akhri heshiiskaaga** si aad u aragto waxa ku qoran inaad samayso markaad guureyso.
- **Iimayl u dir mulkiilaha** ogeysii inaad rabto inaad ka guurto. Sii ciwaankaaga cusub, waydii inay kuu soo celiyaan deebaajigaaga. Waydii inuu kula hubiyo.

Kahor maalintaada u dambeysa...

- **Bixi waxa lagugu leeyahay,** sida kirada ama laydhka, biyaha iyo gaaska.
- **Bilow xirxirashada sida ugu dhaqso badan**. Nadiifi oo xaaq. Ka takhalus qashinka. Xusuusnow inaad hubiso armaajooyinka, saqafyada, iyo garaashyada.
- **Samee hubin**. Faahfaahinta hubinta, fiiri gadaasha xaashidan.

Maalinta aad guureyso...

- **Kala bax dhammaan alaabtada guriga.** Haddii aad wax ka tagto, waxaa lagugu soo dallaci karaa lacag si lagaaga soo saaro.
- **Sawiro iyo muuqaalo ka qaado** si loo hubiyo inaad kaga tagtay xaalad badqab ah.
- **Celi furayaashaada.**

LEGAL AID SOCIETY (833) 837-HOME

NHBA SOMALI - Security Deposits KYR (615) 701-7957

AMAC (615) 988-6460

NASHVILLE CONFLICT RESOLUTION CENTER

ROOFTOP NASHVILLE

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay oo keliya Degmada Davidson. Macluumaadka halkan lagu bixiyay maaha oo looguma talagelin inay ka dhigaan talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, fadlan wac qareen gaar ah ama wac Ururka Gargaarka Sharciga ee deegaankaaga ee Middle Tennessee iyo xafiiska Cumberlands 1-800-238-1443 ama Ururka Nashfiil Hisbaanik Bar 1-615-701-7957. Dib loo eegay 5/24.

AMNIGA DEEBAAJIGA

Kiraystayaasha: Ogow Xuquuqahaaga!

Sideen dib ugu heli karaa deebaajigayga?

1. **Jadwal u samayso mulkilaha gurigaaga 4 cisho** gudahod markad ka guurto.
2. Inta lagu jiro hubintaas, **samee liiska** waxyeelooyinka iyo kharashka dayactirka waxyeeladaas mulkiilahaaga. **Haddii mulkiilahaagu aanu ku siin a liiska kharashyada, ma haysan karaan deebaajigaaga.**

   A. Haddii aad ku khilaafsan tahay **wax ku saabsan liiskooda**, **ku qor "lagu muransan yahay"** halka ku xigta shaygaas oo **ku saxiix magacaaga.**

   B. Codso koobiga liiska ama **sawir ka qaad**.

   C. Mulkiilahaagu waxa uu ku dari karaa **dhibaatooyin kale** hadii ay ku helaan **30 cisho** gudahood markaad ka guurto. 30-ka cisho waxay isu badeli kartaa **7 cisho** hadii kirayste cusub soo galo.
3. Sii mulkiilahaaga **ciwaanka cusub** ee aad rabto in laguugu diro deebaajiga.
4. Markaad guurto ka dib, **u dir milkiilahaaga codsi qoraal ah** oo aad ku codsanayno deebaajigaaga.

Haddii mulkiilahaagu uu sheego inuu haysan doono qayb ama dhamaan deebaajigaaga, waa inaad ku jawaabtaa **60 cisho gudahood**. Way fiicantahay inaad qoraal kaga jawaabto (sida warqad ama iimaylka) adoo sheegaya waxaad diidan tahay iyo sababta. **Hayso koobiga** jawaabtaada.

Haddii mulkiiluhu aanu weli ku siin liiska kharashaadka ama uu diido inuu soo celiyo deebaajiga ka dib markaad u dirto warqadda, waxaad xerayn kartaa **dacwad** iyaga ka dhan ah.

Haddii mulkiilahaagu uu kuuso celin waayo deebaajigaaga, waad dacwayn kartaa

Si aad dacwad u bilowdo, aad **Maxkamadda Fadhiyada Guud ee Degmada Davidson** ee ku taal **Dhismaha Birch** ee 408 Second Ave. North, Nashville, TN. Aad xafiiska karraaniga ee dabaqa labaad.

Gudbi Warqada Waaranka Madaniga ah si aad u bilowdo kiiskaaga. Waxaad koobi ka heli kartaa Xafiiska Karraaniga, ama waxaad ka daabacan kartaa **https://circuitclerk.nashville.gov/general-sessions-forms/**. Guji linkiga Pro Se Civil Warrant.

Waxaa jira **lacag** si loo xareeyo dacwadda. Haddii **aadan awoodin lacagtaas**, weydii Xafiiska Karaaniga haddii aad xarayn karto **Dhaar ah in aadan awoodin** si lagaaga dhaafo kharashka xareynta. **La soco** Xafiiska Karaaniga si aad u aragto marka loo shaqeynayo kiiska mulkiilahaaga oo aad u ogaato goorta **dhageysiga** la qabanayo.

Taariikhda dhageysiga dacwadaada, **aad maxkamada**. **Keen caddayn** inaad raacday xeerarka iyo in mulkiilahaagu aanu kuuso celin deebaajiga. **Tus caddayntaada garsoorka oo u sharax dhinacaaga sheekada**. Milkiilaha gurigaagu wuxuu heli doonaa fursad uu ku sharxo dhinacooda sheekada sidoo kale.

Waxaad sidoo kale dhexdhexaadin ka samayn kartaa Xarunta Xallinta Khilaafaadka Nashville halkii aad maxkamad aadi lahayd. Wac (615) 833-8400 si aad u ogaato sida.

LEGAL AID SOCIETY (833) 837-HOME

NHBA

SOMALI - Security Deposits KYR

(615) 701-7957

AMAC (615) 988-6460

NASHVILLE CONFLICT RESOLUTION CENTER

ROOFTOP NASHVILLE

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay oo keliya Degmada Davidson. Macluumaadka halkan lagu bixiyay maaha oo looguma talagelin inay ka dhigaan talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, fadlan wac qareen gaar ah ama wac Ururka Gargaarka Sharciga ee deegaankaaga ee Middle Tennessee iyo xafiiska Cumberlands 1-800-238-1443 ama Ururka Nashfiil Hisbaanik Bar 1-615-701-7957. Dib loo eegay 5/24.